



## **Jamhuuriyadda Federaalka Ee Soomaaliya Wasaaradda Tamarta Iyo Khayraadka Biyaha**

**Warbixin Kooban oo ku Saabsan Qiimaynta Saamaynta Deegaanka Iyo  
Bulshada Ee Mashruuca Dhismaha U Adkaysiga Isbadalka Cimilada Iyada  
Oo Loo Marayo Faya-dhowrka Biyaha Iyo Nadaafadda Ee Degmooyinka  
Doolow, Gaalkacyo, Iyo Qardho Ee Soomaaliya.**

**May, 2024**

## Warbixinta Guud Eee Mashruuca

Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha (WT&KHB) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) ayaa hirgelin doonta mashruuca biyo-celinta, faya-dhowrka iyo nadaafadda u adkeysiga Cimilada (WASH) ee degmooyinka Doolow, Dhusamareeb, Koonfurta Galkacyo, Jowhar, and Qardho, gaar ahaana goobaha Barakacayaasha. Ujeedada ugu weyn ee mashruuca ayaa ah: horumarinta heerka nololeed ee dadka ku nool goobta barakacayaasha ee degmooyinka kor ku xusan iyada oo loo marayo bixinta biyo joogto ah iyo horumarinta adeegyada nadaafadda. Mashruucu wuxuu ka kooban yahay afar qaybood kala ah: 1) dayactirka iyo ballaarinta nidaamyada biyaha; 2) balaarinta fayadhowrka iyo nadaafadda; 3) daraasaadka maalgashiga u adkeysiga cimilada; iyo 4) tayaynta iyo xoojinta hay'adaha dowliga ah.

Sida ku cad qodobka labaad ee mashruuca, degmooyinka la beegsanayo waxay ka faa'iidayaan doonaan mashruuca siiba dhanka horumarinta ceelal gacmeedyada; dhismaha haamaha biyaha; dayactirka ceelasha riigagga ah ee jira, iyo dhisidda goobaha biyaha ee la wadaago, musqulaha, iyo goobo-biyoodyada. Marka la dhammeeyo, mashruuca waxaa la filayaa in uu u adeego dadka danyarta ah, barakacayaasha iyo dhammaan bulshada deegannada kor ku xusan.

Haddaba waxaa la sameeyay sahaminta iyo qiimaynta saameynta mashruucu ku yeelan karo deegaanka iyo bulshada ee deegaannada mashruuca laga hirgelin doono iyada oo la tixgeliyay xaaladaha soo socda sida: cimilada, qaab-dhis-meedka deeganka, khayraadka biyaha, dhirta iyo xayawaanka, helitaanka adeegyada bulshada, jinsiga, lahaanshaha iyo isticmaalka dhulka, iyo isbedelka cimilada.

### Qaab-dhismeedka hay'adaha iyo sharciga

Si loo hirgeliyo mashruuca loona xaqiijiyo ujeedooyinka laga doonayo, mashruucu wuxuu ku shaqayn doonaa siyaasado iyo qaabab sharci oo kala duwan, waxaana ka mid ah: sharciyada iyo siyaasadaha JFS, kuwa maamul goboleedyada, iyo sidoo kale Nidaamka Badbaadinta Isku-dhafka ah (*Integrated Safeguards System*) ee Bangiga Horumarinta Afrika (*African Development Bank*), heshiisyada caalamiga ah ee JFS ka tahay saxiixe, iyada oo ujeedadu tahay horumarinta saameynta wanaagsan ee mashruuca, isla mar ahaantaasna la yareynayo saameynta togan.

### Khataraha Deegaanka iyo Bulshada ee Mashruuca:

Fulinta Mashruuca waxa ka dhalan karta saameyn togan iyo mid taban oo dhinacyo leh sida: qaab-dhismeedka deegaanka, bayooloji, iyo dhaqan-dhaqaale – kana dhalanaya marxaladaha kala duwan ee mashruuca (diyaarinta, dhismaha iyo shaqaynta mashruuca). Natijjooyinka wanaagsan waxaa ka mid ah tayada biyaha oo la hagaajiyay iyo tirada, adeegyada caafimaadka oo la xoojiyay, iyo fursadaha shaqo. Hase yeeshee, caqabadaha sida nabaad-guurka ciidda, wasakhawga hawada iyo biyaha, iyo arrimaha bulshada sida xadgudubyada ku salaysan jinsiga (*Gender Based Violence*) iyo shaqaalaysiinta carruurta, waxaana lagama maarmaan ah in si taxadar leh loo maareeyo.

Maaraynta khataraha kor ku xusan ayaa iyadana la diyaariyey, sida xaddidaadda jaridda dhirta, isticmaalka qalab aan dhib u geysanaynin deegaanka iyo bulshada, iyo hirgelinta farsamooyinka ilaalinta ciidda. Intaa waxaa dheer, tillaabooyin kor loogu qaadayo wacyiga xadgudubyada jinsiga

, hubinta maaraynta qashinka, iyo samaynta olole nadaafadeed oo ujeedadeedu tahay in la yareeyo khataraha la xidhiidha badqabka iyo caafimaadka bulshada.

Iyada oo ay jiraan caqabado, hadana warbixintan waxay soo jeedinaysa in loo hoggaansamo qorshayaasha yaraynta qataraha ee la soo jeediyay, lana badiyo faa'idooyinka togan ee ka dhalan kara mashruuca wax tarna u leh bulshooyinka deeganada mashruuca laga hirgelinayo.

### ***Khataraha dhanka Deegaanka***

- Khalkhal ku yimaadda hab-nololeedka noolaha deegaanka, isbeddelka hababka socodka biyaha, dhimashada noolaha sida xayawaanka.
- Wasakhowga ka dhasha qashinka iyo kiimikada, wasakhowga ilaha biyaha iyo ciidda.
- Korodhka u nuglaanta masiibooyinka cimilada la xidhiidha, ka sii dara khataraha cimilada.
- Isticmaalka kheyraadka (warqad, tamar, gaadiid), qiiqa kaarboonka.

### ***Khataraha Bulshada:***

- Barakaca bulshooyinka, khalkhal ku yimaadda maciishadda, iyo colaadaha.
- Barakaca bulshooyinka, khataraha caafimaad ee ka imanaya qashin-qubka aan habboonayn.
- Saamaynta aan loo eegin ee bulshooyinka nugul, la'aanta qorshaynta kaabayaasha loo dhan yahay.
- Sinnaan la'aanta dhanka dhaqaalaha oo ka si darta sida ka saarida kooxaha qaarkood barnaamijyada dhisidda kaabayaalsha biyaha I.W.M.

## **Maaraynta khataraha deegaanka iyo bulshada ee la xariira mashruuca:**

Tallaabooyinka yaraynta iyo ka takhalusidda khataraha kala duwan ee la xidhiidha mashruuca laguna wajaho caqabadahaas. Halkan waxaa ah si guud lagu soo koobay tallaabooyinka yaraynta muhiimka ah ee khataraha:

### ***Deegaanka***

- Xakamaynta jaridda dhirta meelaha loo baahan yahay iyo dib u soo celinta goobihii dhismaha xaaladdoodii dabiiciga ahayd (ka hor mashruuca)
- Nabaad-guurka Ciidda: U isticmaal ciidi laga qoday dhulka in dib ugu buuxiyo si haboon
- Wasakhowga Hawada: Sii shaqaalaha dhismaha dhar ilaalinta badqabka ah si joogto inta lagu guda jiro waqtiga dhismaha iyo shaqada.
- Wasakhowga Biyaha: Ka ilaali qulqulka wasakhaysan iyo walxaha waxyeelada leh inay galaan webiyada iyo ilaha biyaha kana saar goobta biyaha wasakhaysan.
- Wasakhowga Sawaxanka: Ku diyaari shaqaalaha qalabka ilaalinta badqabka (*Personal Protective Equipment*) iyo qalabka ilaalinta maqalna jadwalna u samee shaqada dhismaha, waqtiga loogu talo galay, helaan fasax, shaqeyaan saacadaha logu talo galay maalinki.

### ***Deegaanka Nafleyda:***

- Xaalufinta dhirta: Yaree jarida dhirta, u isticmaal noocyada

### ***Deegaanka dhaqan-dhaqaale:***

- Xadgubudyada ku Ku Salaysan Jinsiga: Turjum oo dhaqangeli xeerka Qandaraaslaha oo af Soomaali ku qoran, wacyigeli shaqaalaha, kuna tababar sharciyada iyo siyaasadaha jira ee ku saabsan ka hortaga xadgudubyada jinsiga iyo dembiyada kale .U sheeg in mashquuca leeyahay nidaam lagu qabto cabashooyinka oo la isku halayn karo qofna aysan dhib ka so gaarayn cabasho uu gudbiyey.
- Shaqaalaynta Carruurta: Xaqiiji da'da shaqaalaha oo hubi in carruurta aan qaan-gaarin laga shaqaalaysiyo mashruuca si waafaqsan shuruudka dalka.
- Cudurada Faafida: Samee ololayaasha wacyigelinta nadaafadda iyo faafinta macluumaadka ku saabsan khatarta cudurada faafa , kuwa ka dhasha goobaha saxo xumadu ka jirto, , kuwa faafa sida caabuqyada iyada oo shaqaalaha inta badan laga shaqaalaysinayo deeganada mashruuca.

### **Habka qabashada iyo Xalinta Cabashada**

Habka xallinta cabashooyinka (Greivance Redress Mechanism) ayaa loo samayn doona mashruuca si ay u noqoto madal ay daneeyayaalsha mashruuc ka helaan warbixin kuna soo gudbiyaaan wixi cabashooyin ah oo ay qabaaan. Nidaamka qabashada iyo xalinta cabashooyinka (Greivance Redress Mechanism) waxa uu ku shaqayn doonaa sharciyada dalka u yaallo wuxu yeelaan doona heer federaal iyo mid goboleed. Qaabkaan ayaa noqon doono mid u sahlo dhammaan daneeyayaalsha iney so gudbiyaan cabashooyindooda.

Sidoo kale, waxaa jiri doona hannaan gaar ah oo gudaha GRM ah kaas oo loogu talagalay cabashooyinka la xariira xadgudubyada jinsiga (GBV), Ka faaidaysida jinsiga la xariira iyo tacadiyada jinsiga kaas oo ah qaad qarsoodi ah, tayo leh, awoodna u leh caawinta dhibaneyaasha.

### **Wada tashiyada Daneeyayaalsha Mashruuca:**

Kulamo wada tashi ah iyo doodo ayaa loo qabtay daneeyayaasha mashruuca oo ah sadex heer: heer federaal/qaran, heer gobol iyo heer deegaan. Kooxda qiimaynta samaynaysay waxay kulamo la yeeshen mas'uuliyiinta WT&KHB federaalka, wasaaradaha dawlad goboleedyada, maamulka dawladda hoose, iyo wakiillo ka socday guddiga degmooyinka iyo tuulooyinka, hay'adaha ka shaqeeya deeganka iyo ururada bulsha, barakacayaasha iyo bulshooyinka martida loo yahay ee nugul (haweenka, caruurta iyo dadka waaweyn). Guud ahaan, dhammaan daneeyayaasha lala tashaday waxay taageereen mashruuca, laakiin waxay ka codsadeen WT&KHB iyo maamulka dawladdaha hoose inay yareeyaan ama meelsha-ka-saaran khataraha mashruuca, sido kale kordhiyaan shaqaalaynta bulshada deegaanka inta lagu jiro fulinta mashruuca. Waxaa kale oo jiray codsiyo ah in la kordhiyo waxqabadyada mashruuca laguna baahiyo deeganada kale.

### **Gabagabo**

Warbixinta Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada ee mashruuca (QSD&B) waxaa ku lifaaqan Qorshaha Maaraynta Deegaanka iyo Bulshada (QMD&B) si ay u hagto hay'adaha ay khusayso iyo daneeyayaasha kale ee dhismaha biyo-gelinta iyo nidaamka faya-dhowrka ee goobaha barakacayaalsha ee degmooyinka kor ku xusan. Qorshahan wuxu diiradda saaraya in la yareeyo saamaynta taban, ka hor bilowga mashruuca, inta lagu jiro iyo hirgelinta mashruuca. Iyada

oo la fulinayo tallaabooyinka yaraynta ee warbixinta lagu soo jeediyay. Saamaynta togan ee ka iman karta hawlaha mashruuca waa la yarayn doonaa waxaana la kordhin doonaa kuwiisa wanaagsan ama taban. WT&KHB ee JFS ayaa masuul ka ah hirgelinta qorshaha maaraynta khataraha deegaanka iyo bulshada ee ka dhalata mashruuca iyada oo la xisaabtamaysa dhammaan daneeyayaalsha mashruuca iyo qandaraasleyaasha mashruuca.

Mahadsanidiin,

No	Name of Documents	Status
1	ESIA Report for horyal IDP camp in south galkacyo district_final 270324	Published MoEWR Website
2	ESIA Report for kaharey IDP camp in doolow district_final 26324	Published MoEWR Website
3	ESIA Report for ladan IDP camp in doolow district_final 26324	Published MoEWR Website
4	ESIA Report for new qansaxley IDP camp in doolow district_final 26324	Published MoEWR Website
5	ESIA Report for qurdubey IDP camp in doolow district_final 26324	Published MoEWR Website
6	ESIA Report for shabelle IDP camp in qardho district_final 27324	Published MoEWR Website
7	ESIA Report for shimbiralle village in qardho district_final 27324	Published MoEWR Website
8	ESIA Report for somali-weyn IDP camp in south galkacyo district_final 27324	Published MoEWR Website